# Rugta Caafimaadka ee Haweenka

## Yaa iman kara rugta caafimaadka?

Qof kasta oo lagu sameeyay gudniin dhaqameed wuxuu iman karaa rugta caafimaadka, iyadoon loo eegayn da'deeda. Waad iman kartaa haddii aad yar tahay, uur leedahay, ama aad qof weyn tahay oo aad rabto inaad ka hadasho gudniinkaaga.

Haddii aad rabto in lagugu sameeyo qalliin lagu furayo xubinta tarankaaga (oo loo yaqaan 'deinfibulation'), waxaad ku samayn kartaa halkan.

Haddii aad uur leedahay, waa in la sameeyaa ka hor 34 toddobaad.

Kuma samaynayno habab kale oo qalliin ah rugtan.

Rugta caafimaadku waxay furan tahay Jimcaha.

## Sida aan kuu daryeelno

Rugta Haweenka Afrikaanka waxaa maamula kalkaalisooyin/ umulisooyin khibrad u leh daryeelka dadka soo maray gudniinka fircooniga ah ama goynta dhaqameed.

Waxay kaala hadli doonaan caafimaadkaaga iyo gudniinkaaga. Waxay kuu sharxi doonaan qalliinka, isbeddelada aad dareemi doonto qallinka kabacdi, iyo soo kabashadaada.

Waxay sidoo kale ku siin doonaan macluumaad iyo taageero arrimo kale oo caafimaad.

Shaqaalaha Barnaamijka Waxbarashada Xuquuqda Dhalmada iyo Qoyska (A Family and Reproductive Rights Education Program - FARREP) ayaa ku taageeri kara ballamahaaga.

Haddii aad haysato **kaarka Medicare**, adeeggu waa bilaash.

Haddii aadan haysan kaarka Medicare, fadlan la hadal shaqaalaha FARREP. Waxaad ka wici kartaa (03) 8345 3058.

## Ballan markaad sameysanayso

Uma baahnid in dhakhtarkaaga (GP) uu kusoo gudbiyo si aad u timaadid rugta caafimaadka.

Si aad ballan u qabsato, kala xidhiidh FARREP (03) 8345 3058.

Takhtarkaaga guud ama kalkaalisada caafimaadka bulshada ayaa waliba fakis ku diri karta (03) 8345 3036.

Interpreter

**Fadlan noo sheeg haddii aad u baahan tahay turjubaan marka aad ballaman qabsato.**

Waxaa laga yaabaa inaad leedahay wax ka badan 1 ballan:

- Ballanta koowaad: waxaanu kaala hadlaynaa taariikhdaada caafimaad.
- Ballanta labaad: waxaanu samaynaynaa qalliinka.
- Ballanta saddexaad: waxaanu hubinaynaa soo kabashadaada qalliinka ka dib.

Mararka qaarkood, qalliinka waxa la samayn karaa ballantaada ugu horreysa.

## Maxaa ka dhici doona ballamahaaga?

Kalkaalisada/ umulisada rugta caafimaadka ayaa:

- eegi doonta gudniinkaaga si ay u aragto nooca qalliinka aad u baahan tahay
- kaala hadli doonta wixii arrimo caafimaad ah ee aad qabtid
- haddii aad go'aansato in lagu qalo, waxaanu kuu sharxi doonaa sida loo sameeynayo - sidoo kale waxaan isticmaali karnaa sawirro haddii taasi ay ku caawinayso
- kuu sharixi doonto sida jidhkaagu isu bedeli karo qalliinka iyo soo kabashadaada ka dib
- haddii aad qabto xanuuno kale, waxaan kuu sheegi karnaa adeegyada kale iyo sida loola xiriiro
- kula kulmi doonta mar labaad 4 ilaa 6 usbuuc qalliinka ka dib si ay u aragto sida ay xaaladaadu tahay.

Shaqaalaha FARREP ayaa:

- taageeri doona qof kasta oo ka soo jeeda dhaqamada gudniinka dumarka mararka qaarkood lagu dhaqmo
- kaa caawin doona inaadtagto balantaada wayna kula joogi doonaan wakhtiga aad ballanta la leedahay kalkaalisada/ umulisada
- kaa caawin doona wax yaabaha la taaban karo sida gaadiidka aad ku imaanayso ama uga tageyso isbitaalka, xanaanada caruurta, turjubaanada, iyo adeegyada kale
- ku siin doona macluumaad ku saabsan adeegyada waxtarka leh iyo sida loola xiriiro, ee isbitaalka iyo bulshada labadaba
- ku siin doona macluumaad ku saabsan gudniinka iyo sharciga Victoria
- ku siin doona macluumaadka caafimaadka ee loogu talagalay adiga iyo gabadhaada (haddii ay gabar kuu joogto).

## Faahfaahinta xiriirka

Shaqaalaha FARREP waxaa la heli karaa Isniinta ilaa Jimcaha, 9-ka subaxnimo ilaa 5-ta galabnimo

T: (03) 8345 3058
E: farrep.program@thewomens.org.au
F: (03) 8345 3053

Ama la xidhiidh shaqaalaha FARREP ee xarunta caafimaadka ee bulshada deegaankaaga.

Ka raadi mareegahayaga wixii macluumaad dheeraad ah:
http://www.thewomens.org.au/health-information

## Isku xirka luqadda

በርስዎ ቋንቋ መረጃ ለማግኘት በድረገጻችን ላይ ይጎብኙ
للحصول على المعلومات بلغتكم زوروا موقعنا الإلكتروني
用您說的語言瞭解詳情，請瀏覽我們的網站
Για πληροφορίες στη γλώσσα σας επισκεφθείτε την ιστοσελίδα μας
अपनी भाषा में जानकारी प्राप्त करने के लिए हमारी वेबसाइट पर जाइए
Per informazioni nella vostra lingua visitate il nostro sito web
Macluumaad intaas ka badan oo af Somali ah booqo websaytkayaga
Kendi dilinizde bilgi almak için web sitemizi ziyaret edin
Để biết thông tin bằng ngôn ngữ của quý vị, hãy truy cập trang mạng của chúng tôi

## Taageerada Rabshadaha Qoyska

### 1800 Xushmad Khadka Caawinta Qaranka

Waxaad heli kartaa caawimo haddii aad la kulantay xadgudub galmo, rabshad guri ama qoys iyo xadgudub. Waxaad wici kartaa wakhti kasta oo habeen iyo maalin ah.
1800 737 732
1800respect.org.au

**Cudurdaar:** Xaashidan xaqiiqadu waxay ku siinaysaa macluumaad guud oo keliya. Wixii talo gaar ah ee ku saabsan baahiyahaaga daryeelka caafimaadka, waa inaad talo ka raadisaa xirfadlahaaga caafimaadka. Royal Women's Hospital ma aqbalayo wixii masuuliyad ah ee ka yimaada khasaaraha ama dhaawaca ka dhasha ku tiirsanaantaada xaashidan halkaad arki lahayd xirfadle caafimaad. Haddii aad u baahan tahay daryeel caafimaad oo degdeg ah, fadlan la xidhiidh waaxda degdegga ah ee kuugu dhow.
© The Royal Women's Hospital 2025